Sida loo sharxo dadka la tuhunsan yahay, baabuurta iyo dhaqdhaqaaqa

Marka aad u wacdo si aad u soo sheegto dambi, sida aad u sharraxdo waxa aad aragtay aad ayay muhiim u tahay. Macluumaadkaaga ayaa u oggolaan doona sarkaalka (saraakiisha) jawaabistu inuu qiimeeyo xaaladda una jawaabo si habboon.

Sharrixista dadka la tuhunsan yahay

Si wanaagsan ula soco jinsiga, isirka, da'da, joogga, culayska, timaha, gumaarka, taatuuga, muraayadaha, timaha wejiga, dharka iyo wixii kale ee booliska ka caawin kara inay helaan qofka. Haddii aanad waqti u haysan in aad si wanaagsan ula socoto waxan oo dhan, aad ugu fiirso waxyaalaha qofka la tuhunsan yahay aanu beddeli karin. Sidoo kale la soco jihada qofkala tuhunsan yahay uu aadayo.

Sharrixista baabuurta

La socotaargada shattiga iyo jihada baabuurka u soconayo. Kaddib la soco midabka, shirkadda samaysay, sannadka, qaabka iyo sifooyinkakale sida jugta ama istikarro ku dhagsan bambarka.

Sharrixista dhaqdhaqaaqa

Sii tafaasiisha ugu badan ee aad karto ee kusaabsan sababta qofkan iyo dabeecaadiisaa aad u tuhuntay oo ay uga duwan yihiin xaafaddaada. Tani waxay caawin doontaa in qofka qabta telefoonada soo dhaca inuu sarkaalka hormariyo wicitaankaaga.

Goorta AAN la wacayn midna labada lambar

Marka aad u baahan tahay macluumaad kusaabsan ganacsi ama adeeg, xaaladaha waddada, ama aad rabto inaad sheegto korontada go'day ama xayawaan dhibaato lagu qabo balse aan halis taagan ahayn, ha wicin 9-1-1 ama lambarka aan gurmadka ahayn.

Haddii aad qabto cabasho ama su'aal la xidhiidh adeeg ay bixiso Magaaladu, wac Khadka Macluumaadka Magaalada iyo Degmada 503-823-4000 si aad u codsato lambarka Xafiiska gaarka ah ee wax u qaban kara wicitankaaga.

.

Goorma ayey tahay inaan internetka ka soo gudbiyo warbixinta la siiyo boliiska?

Xafiiska Boliiska Portland wuxuu leeyahay Nidaamka Warbixinta Internetka ee Mudwaadinka. Nidaamka internetka kusalaysan wuxuu u oggolaanayaa muwaadiniinta inay sheegaan dambiyada qaar lagu galay gudaha Magaalada Portland taasi oon lahayn macluumaadka cidda la tuhunsan yahay.

Muwaadiniintu waxayadeegsan karaan internetka si ay kuugu sheegaan noocyada dhacdooyinka soo socda:

- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hantidaa (ee warbixin hore laga soo gudbiyay)
- Hanti dhuntay
- Dukaan xadis
- Dhaqdhaqaaq la tuhunsan yahay maalinta ugu dambeyso (ayna kujirin wax iminka dhacayaa)
- Xatooyo (laga geysto meelo dadwaynuhu isticmaalaan)
- Gaadiid wax laga xado
- Burburinta (marka laga reebo qoraalada iyo sawirada lagu sameeyo darbiyada)
- Kharbudista baabuur

Nidaamka Warbixinta Internetka ee Muwaadinka waxa laga gali karaa www.portlandoregon.gov/police/cor.Fiiri boggaan Internetka in badan si aad u heshid fursadaha cusub ee lagu gudbiyo warbixinta

Gurmadka 9-1-1
Aan Gurmad Ahayn 503-823-3333
Macluumaadka Magaalada Portland
503-823-4000

Goorta la Waco 9-1-1 iyo lambarka aan gurmadka ahayn

Gurmadka 9-1-1
Aan Gurmad Ahayn 503-823-3333
Macluumaadka Magaalada Portland
503-823-4000

Goorta la Waco 9-1-1 iyo lambarka aan gurmadka ahayn 503-823-3333

Goorta la waco 9-1-1

Wac 9-1-1 marka ay gurmad tahay taasi oo jawaab degdeg ah uga baahan boliiska, dabka ama ambalaaska. Tusaalooyinka waxaa ka mid ahdambi socda sida dagaal, xatooyo, toogasho, iwm; dab ka socda dhisme ganacsi, guri ama baabuur; ama gurmad caafimaad sida wadne-xanuun, dhiigga ku furma madaxa ama shil-baabuur oo dhaawacyo leh. Haddii aanad hubin inay xaaladdu tahay gurmad, wac 9-1-1, qofka wicitaanka ka jawaaba ayaana go'aamin doona haddii aad u baahan tahay caawimo gurmad ah.

Maxay 9-1-1 i waydiin doontaa?

Marka aad wacdo 9-1-1, qofka wicitaanka ka jawaabaa wuxuu ku waydiin nooca gurmadka (dab, caafimaad ama boliis) iyo goobta caawimada loo baahan yahay. Qofka wicitaanka ka jawaabaa sidoo kale wuxuu ku wyadiin tafaasiil khaas ah, sida:

- Sharraxaadda jirkadadka kfu lugta leh.
- Sharraxaadda dabka laga yaabo in uu gubanaayo.
- Dhaawacyada ama calaamadaha qofka raba gurmadka caafimaad.
- Magacaaga iyo lambarkaaga taleefanka.

Su'aalaha qofka wicitaanka ka jawaabayaa waxay muhiim u yihiin inaad hesho nooca saxda ah ee caawimo si dhakhso ah. Ka jawaabista su'aalahan dib uma dhigto jawaabta.

Maxaan khadka ugu jirayaa?

Inta aad khadka kula jirto qofka wicitaanka ka jawaaba, isaga ama iyada waxay u diraysaa macluumaadkaaga hawl-galiyaha, kaasi oo si toos ah ula xidhiidha dabka, caafimaadka iyo boliiska. Inta aad khadka kujirto oo aad su'aalaha ka jawaabayso, caawimada ayaa kugu soo aaddan.

Qabtaha wicitaanku waxa dhici karta inuu u baahdo inuu khadka kugula jiro si uu gurmadka u siiyo macluumaad dheeraad ah. Ha dhigin taleefanka ilaa lagu faro in aad dhigtid.

Taleefanada gacanta iyo 9-1-1

Haddii aad ka wacdo 9-1-1 taleefanka gacanta, waxaad heli doontaa duubis kugu jihayn doonta inaad riixdo battan kasta ama dhahdo "9-1-1 marka aad maqasho bib. Filtarkaan waxa loogu talogalay in lagu yareeyo wicitaanada iskaga soo dhacaya 9-1-1. Tani waxay u oggolaanaysaa qabtayaasha wicitaanka inay diyaar ahaadaan si ay uga jawaabaan wicitaankaaga gurmadka.

Fadlan ha u qaadan in qofka wicitaanka ka jawaabayaa ku hayo macluumaadkaaga khaaska ah ama meesha aad ku sugan tahay kombiyuutarka. U diyaargarow inaad ka jawaabto su'aalahan marka lagu waydiiyo. Had iyo jeer waxa fiican inaad garanayso meesha aad joogto marka aad wacayso.

Tarjumaan ma jiraa?

Adeegyada luuqadda khadka ayaa jira 9-1-1 iyo lambarka Aan Gurmadka ahayn. Fadlan khadka ha ka bixin marka qofka wicitaanka ka jawaabayaa kugu xidhiidhinayo tarjumaan.

Goorma ayaa la wacayaa Lambarka Aan Gurmadka Aahayn

Lambarka aan gurmadka ahayn waa 503-823-3333, kaasi oo aad wici karto 24-ka saacadood caawimada bilayska ee Aan Gurmadka Ahayn. Ku kaydi lambarkan taleefankaaga gacanta si markaa ay kuugu fududaato inaad wacdo marka aad u baahato. Adiga oo isticmaalaya lambarka Aan Gurmadka AahayLambarka gurmadku wuxuu ku ilaaliyaa 9-1-1 inay heli karaan gurmadyada dhabta ah. Dadka wicitaanada ka jawaaba kuwaasi oo qabta wicitaanada 9-1-1 ayaa sidoo kale ka jawaaba khadka Aan Gurmadka Ahayn. Haddii aad u wacdo 9-1-1 arrin aan gurmad ahayn, waxa laguu duwi dhigista taleefanka oo la wici lambarka Aan Gurmadka Ahayn.

Tusaalayaasha qaar marka ay tahay inaad wacdo 503-823-3333 waxa kamid ah:

- Gurigaaga oo loo dhacay adiga oo shaqada ku maqan. Tuugii meesha ma joogo adigana waad bed qabtaa.
- Ilmahaagii baxsaday oo guriga ku soo laabtay.
- Adiga oo raba inaad macluumaad ku darto dhacdo hore loo tabiyey.
- Baabuurkaagii oo la xaday habeenimadii.
- Gurigaaga oo la kharbuday mar hore.

Sidoo kale waxaad wici kartaa 503-823-3333 si aad u sheegto dhaqdhaaqaaq la tuhunsan yahay oo xaafaddaada ka socota.Tusaalayaasha hawlaha la tuhunsan yahay waxaa kamid ah:

- Qof lugaynaya jidka oo fiirinaya daaqadda baabuur kasta.
- Qof ayaa albaabkaaga ku soo socda isagoo oo samaynaya codsiyo aan caadi ahayn, sida lacag uu shidaal ama cunto ku gato, ama deeqo samofal marka qofku aanu sidan wax u muuqda rasmi.
- Aad aragto dadka jidadka maraya oo u dhaqmaya si la tuhmi karo. In kasta oo wax dambi cad ah aan la galayn, qofna aanu u muuqan inuu halis ku jiro, oo aad jeclaato inuu boliiska hubiyo.